

Kitaabka Quduuska ah ee  
loogu talo galay Carruurta  
Soo-jeedinayaa



Gabadhii  
Nooleyd  
Labada Jeer



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Janie Forest  
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service  
email: zemendale@gmail.com  
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children  
[www.M1914.org](http://www.M1914.org)

©2023 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato  
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.






Yayros wuxuu ahaa  
mid ka mid odayaasha  
diinta Yuhuudda oo  
Ilaah caabudo oo  
dadka kalana baro  
Ereyga Ilaah. Maalin  
baa, waxaa la soo  
gudboonaatay  
dhibaato Yayros.



Gabadhisii uu jeclaa, oo da'deedu laba iyo toban sanado jir keliya ahayd ayaa aad u buktay. Waxayna u muuqatay inaysn jirin cid caawin karaysa iyad. Aad bayna u buktay, Yayros wuu ogaa inay dhimanayso.



Qof keliyaata ayunbaa caawin kara gabadhiisa Yayros. Waxaa u suurta gashay Yayros inuu helo Ciise oo uu keeno gurigiisa. Yayros laga yaabaa inuu saaxiibadisii culimada diinta inaysan aqoonsanayn Ciise, laakiinse Yayros waxba kama galin taasi.



Waxaa u drnayd inuu helo caawimaad degdeg ah inta aysan dhiman gabadhiisa.





Yayros wuxuu  
Ciise arkay  
Isagoo dad  
badan ku  
hareeraysan  
yihiin.  
Cagahiisii  
ayuu isku  
riday.





"Gabadheedii  
yarayd waa  
sakaraaad,"

Ninkii rajo  
la'anta ahaa  
baa ku  
baryootamay  
sidaa.

"Kaalay oo  
gacmahaaga  
saarinay bogsato  
oo noolaato."





Ciise wuxuu raacay Yayros. Laakiin dadkii badnaa dartood ma aysan uga dhakhsan sababta oo ah meeshaa waxaa ka jiray saxmad weyn oo cidhiidhi badan baa jiray. Naag baa ilaa laba iyo toban sanadood xanuunsanayd, oo dhakhtar walba way u tagtay (oo lacag badan bay ku bixisay) wax caawimaad ama dawo ah na kama aysn helin. Alla, sida ay u doonaysay inay Ciise aragto!







Maxay samayn kartaa naagtaa? “Haddii aan dharkiisa iska taabto uun, waan bogsanayaa,” Naagtii sidaa bay ku guryaantay ama ku guuxday. Iyadoo siqeyso ayay Ciise ugu timid meel ay ka gaari karto. Dabadeed intey gacanteda fidisay, ayay taabatay khamiiskiisii.





Waa mucjiso! Waa MUCJISO!  
Naagtii way bogsootay! Si  
buuxda ayay u garatay ama u  
ogaatay inay caafimaaday oo  
xoogeysatay gabi ahaanba.  
Laakiin dabadeed cod dheer  
lagu hadlay. "Yaa i taabtay?"  
Ciise ayaa weyddiiyey dadkii  
ku xoonsanaa isaga. Laakiin  
garatay inay bogsootay ayuu  
doonayay Isaga inay u sheegto  
waxyaalah ku saabsan. Isala  
saacaddiiba way u sheegtay  
Isaga sheekadii oo idil.



Isla markii, shaqaalihiii gurigii Yayros baa yimid.  
Wajigoodana waxaa ka muuqday murugo inta aysan  
hadlin ka hor. "Gabadhaadii waa dhimatatay!" ayay u  
dheegeeen Yayros. Dhimatay!  
Waxay ahayd wax soo raagay.

Laga yaabaa, haddii naagtii  
ayna daahinin arrinta .....  
laga yaabee, haddii .....  
Dhimato! Yayros  
gabadhiisii yareyd qiimaha  
lahayd way tagi lahayd.



Markii Ciise maqlay  
taa iyada ah, ayuu ugu  
jawaabay, "Ha baqin  
ee iska rumeysa, oo  
caafimaad bay heli  
doontaa." Sida ay ugu  
adagtahaya Yayros  
inuu runtii rumeysto  
Ciise. Gabadhiisii  
way dhimatay.



Gurigiina, qofwalba wuu ilmeynayay oo waxaa loo murugeysnaa geerida gabadha. "Gabadhu ma dhiman, waase huruddaa," ayuu Ciise ku yidhi iyagii. Iyaguna aad bay ugu qosleen. Wey ogaayeen oo hubeen inay gabadhu dhimatay oo maydkeeda yaalo.



Ciise kulligood dibadda  
ayuu isaga saaray,  
gacantii gabadha  
yaryad ayuu qabtay  
oo ku yidhi, "Gabadha  
yareedey waxaan ku  
leeyahay kac."



Yayros meesha wuu joogay, naagtiisa wey joogtay.  
Saddex ka mid ah xertii Ciise na way joogeen.  
Dhamantood wey maqlayen ereyadii Ciise gabadhii

yareyd miyey  
maqleysay iyadana?



Gabadhii dhimatay  
way maqashay  
amarkii Ciise.  
Ruuxeediina  
wuu soo noqday,  
oo durbadiiba  
way kacday.  
Ciise wuxuu  
ka soo sara  
kiciyey  
dhaimashadii.





Waalidiintii gabadhana wey amkaageen oo yaabeen.  
Ciise wuxuu ku yidhi gabadha siiya wax ay cunto.  
Bal eega sid ay u farxeen, iyo siday ugu mahad  
celiyeen Ciise. Jacaylkiisa cajiibka ah iyo xoogga  
uu gabadhooda  
uga soo celiyey  
geerida.



Gabadhii Nooleyd Labada Jeer

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,  
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Markos 5, Luukos 8

"Erayadaada furniinkoodu wax buu  
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130



Dhammaad



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!  
Yooxanaa 3:16

